








Shaqo raadin






 Espen Stranger-Johannessen  Sunniva Høyby-Øiset  Mohamed Abdirashid  4  Soomali! 




LIDA Stories

lidastories.net

Shaqo raadin


 Espen Stranger-Johannessen  Sunniva Høyby-Øiset  Mohamed Abdirashid




This work is licensed under a Creative Commons [Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>




Alisha waxay u baahan tahay inay shaqo hesho, waayo qoyskeedu waxay u baahan yihiin lacag ay ku iibsadaan cunto iyo dhar.



Waa ay ku faanaysaa in ay shaqo heshay si ay cunto iyo dhar qoyskeeda ugu soo iibiso lacagteeda.




Alisha kamaysoo shaqaynin waddankeedi!,
laakiin waxay ku fiicanayd cunto karinta,
waxayna jeceshahay inay dadka la
sheekaysato.



Marka xigta ee ay Alisha aaddo wareys!
shaqo oo makhayad ah, waxaa loo soo
bandhigay shaqada. Waa shaqo adag. Inta
badan waa in ay shaqeyso fiidkii, marka
carruurteeda ay ka yimaadaan iskoolka.




Laga yaabaa inay ka shaqayn karto makhaayad? Alisha waxay interneedka ka raadisaa shaqooyinka lasoo dhigo.




Waxay ku dartay faahfaahinta koorsada CV-geeda. CV-gu waa sharaxaad ku saabsan dhammaan shaqooyinkii ay soo qabatay iyo dhammaan koorsooyinkii ay soo qaadatay.

Waxay heshay xayeysiis loogu talagalay
cunto kariye. Taas oo ah qof makhayad
wax ku karinaya.




Alisha waa in ay ka shaqayso makhayad
taas oo qayb ka ah koorsadeeda
tababararka. Mushaar ma hesho, balse
waxay helayaa khibrad shaqo.





Waxay aadaa waraysiga shaqada.
Maamulaha makhaayadda ayaa u sheegay
inay u baahan yihiin qof u tababartay
cunto karinta.



Alisha waa ay niyad jabtay, laakiin waxay
qaadatay koorso loo yaqaan “koorsada
“Cuntada karinta iyo soo dhawaynta”.
Waxayna rajaynaysaa in tani ay ka caawin
doonto inay shaqo ka hesho makhaayad.